IIB MA GALO

# الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 28 Jennaayo 79, L. 1R1

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba** — RUKUNKA: Sanadi waa Sh. 100 Somaliya **gudeheeda — dibaddedana waa** Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu **ka bilabmaa 1 Janayo.** Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba **Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa** la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah **— Lacagta waxaa lagu bixinayaa** Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 4 ee 26 Okt. 78, Toosin Xeerka M.G.S.K. L. 85 ee 11.3.74.. Bogga 10

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 5 ee 17 Dis. 78, Kaalmo gaar ahaaneed oo loo fidinaayo Shirkadda «Impresco».- » 13

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 6 ee 11 Abr. 78, Qaadid Aas-aas Dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Jaalle Maxamed Daahir Nuur oo ay la wareegtay Wakaaladda Madbacadda Qaranka Soomaaliyeed kuna yaal Muqdisho Xaafadda 21ka Oktoobar.- » 15

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 7 ee 30 Seb. 78, Siismo dhul Dawladeed la siiyey Wakaaladda Filimmada Soomaaliyeed - kuna yaal Xamar-Degmada Kaaraan - kuna fadhiya mq. 80.000/. » 17

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 8 ee 12 Dis. 78, Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey Jaalle Cabdi Xasan Cigaal-ku yaal Muq. Degmada Cabdulcasiis kuna fadhiya mq. 2.650/. » 19

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Bed. Naado dhul Jaalle Sheekh Xasan Cabdullahi L. 1

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Bed. Naado dhul Jaalle Maxamed Macallin Caalin L. 2 » 21

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Bed. Naado dhul Jaalle Maxamed Cali Abtidon L. 3

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Bed. Naado dhul Jaalle Faaduma Sayid Cusmaan L. 4 » 22

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Maxamed Shabeel Cawaale L. 5

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Maxamuud Xuseen Maxamed L. 6 » 23

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Maxamed Xasan Caddo & Maxamuud Jiino L. 7

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Mukhtaar Sheekh Muxiddiin L.8 » 24

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Khadiija Xalane Maxamed L. 9

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Maxamed Cabdulle Shiidle L. 10 » 25

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Aamina Maxamed Cali L. 11

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Jamiila Maxamed Cali L. L. 12 » 26

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Xaliima Sacdiya Maxamed Cali L. 13

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Salaad Ducaale Cabdi L. 14 » 27

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Canab Cabdi Cilmi L. 15

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Aamina Maxamuud Xaaji Raydal L. 16 » 28

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Maxamed Ciise Cali Axmed L. 17

WASAARADDA H. GUUD, 24.8.78, Naado dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Warsame L. 18 » 29

WASAARADDA H. GUUD, 10.9.78, Naado dhul Jaalle Ifka Isaaq Cali Carraale L. 19

WASAARADDA H. GUUD, 10.9.78, Naado dhul Jaalle Qaasim Cabdi Gaboobe L. 20 » 30

WASAARADDA H. GUUD, 10.9.78, Naado dhul Jaalle Saciid Maxamed Maxamuud L. 21

WASAARADDA H. GUUD, 10.9.78, Naado dhul Jaalle Saciid Sheekh Maxamed Xuseen L. 22 » 31

WASAARADDA H. GUUD, 10.9.78, Naado dhul Jaalle Sheekh Hilowle Maxamed Nuur L. 23

WASAARADDA H. GUUD, 9.9.78, Naado dhul Jaalle Maxamed Ibraahim Guleed (Industria Chimica e Resine) L. 24 » 32

WASAARADDA H. GUUD, 10.9.78, Naado dhul Jaalle Maryan Xuseen Xasan L. 25

WASAARADDA H. GUUD, 4 Jan. 79, Naado dhul Jaalle Cumar Xaaji Maxamed L. 26 » 33

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.10.78, lumid Jeeg. War. L. yahay 210530 ku qoran Shs. 2.000/- uu leeyahay Maxamed Maax Cali L. 27 » 34

SOMALI BOTTLING COMPANY HARGEYSA, 5.2.79, Digniin Isugu Yeerid ah L. 27/Bis » 35

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 4 ee 26 Okt. 78, Toosin Xeerarka MGSL L. 85 ee 11.3.1974.-

### MADAXWEYNAH J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga 17, 18 iyo 19 ee 1.7.1976;

ISAGOO ARKAY : Xeerka MGSK L. 85 ee 11.3.1974 ee ku saabsan Qaabka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ;

ISAGOO AQOONSAN : Inay tahay lagama maarmaan in Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta lagu kordhiyo WAAX CUSUB :

ISAGOO TIXGELINAYA : Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ;

ISAGOO TIXGELINAYA : Go'aankii Guddiga Siyaahadda ee XHKS iyo Golaha Wasiirrada.

### WUXUU SOO SAARAYAA :

Xeerka soo socda :

#### Qodobka 1aad

1. Waxaa la toosinayaa Xeerarka L. 85 ee 11.3.74 iyo XMJDS L. 17 ee 20.3.65 ee ku saabsan Qaabka iyo Shaqaalaha Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, waxaa lagu kordhinayaa WAAX CUSUB oo la yiraahdo «WAAXDA QORSHAHA, TIRAKOOBKA IYO TABABARKA».

2. Qaabka iyo Shaqaalaha Waaxda cusub waxay noqondoonaan sida ku qoran lifaaqa «B» ee la soeda Xeerkan.

#### Qodobka 2aad

Waaxda Qorshaha, Tirakoobka iyo Tababarka hawsheeda waxay noqonaysaa :-

1. Dejinta Qorshaha Wasaaradda,
2. Kormeerka fulinta Qorshaha,

3. Diyaarinta Tirakoobka la xiriira hawsha Wasaaradda, Maxkamadaha iyo Xabsiyada,

4. Qabanqaabidda Tababarrada Garsoorayaasha iyo Shaqaalaha kale ee Wasaaradda.

Qodobka 3aad

Xeerkan si degdeg ah ayuu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26.10.78

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J.D.S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 5 Bogga lamb. 244
Muqdisho, 8 Nof. 1978
Ku Xigeenka Hantidhawraha Guud
Sax. Xuseen Cabdulle Cali

## LIFAAQA «B»

### WAAXDA QORSHAHA, TIRAKOOBKA & TABABARKA

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | AGAASIMAHA WAAXDA | A/3 | 1 |
| 2. | SARKAAL FULIYE | B/7 | 1 |
| 3. | MAKIINA GARAAC | C | 1 |

### LAANTA QORSHAHA

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | MADAXDA LAANTA | A/6 | 1 |
| 2. | SARKAAL FULIYE | B/7 | 1 |
| 3. | MAKIINA GARAAC | C | 1 |

### LAANTA TIRAKOOBKA

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | MADAXDA LAANTA | A/6 | 1 |
| 2. | SARKAAL FULIYE | B/7 | 1 |
| 3. | MAKIINA GARAAC | C | 1 |

### LAANTA TABABARKA

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | MADAXDA LAANTA | A/6 | 1 |
| 2. | SARKAAL FULIYE | B/7 | 1 |
| 3. | MAKIINA GARAAC | C | 1 |

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 5 ee 17 Dis. 78, Kaalmo gaar ahaaneed oo loo fidinaayo Sharikadda «IMPRESCO».

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY : Sharciga L. 38 ee soo baxay 5 Abriil 1972;

MARKUU ARKAY : Sharciga L. 5 ee soo baxay 16 Agoosto 1976 ;

MARKUU ARKAY : Go'aankii Guddiga Caddaaladda ee Madaxtooyada J.D.S. oo tirtiray Go'aankii Guddiga Dhex-dhexeedinta ;

MARKUU ARKAY : Sababihii Guddiga Caddaaladda ee Madaxtooyada J.D.S. u cuskadeen burinta Go'aankii Guddiga Dhex-dhexaadinta kuwaasoo la xiriira habka dacwadda qaadista (procedure), dulucda dacwadda (substance), fulinteeda iyo qaabkii loo galay dacwadda oo aan ahayn mid sharciga waafaqsan.

ISAGOO TIXGELIYAY : Dhowridda sumcadda iyo magaca dawladda Soomaaliyeed; ilaalinta danta guud ee Qaranka gaar ahaan xiriirka qotoda dheer ee ka dhexeeya Dawladda Soomaaliyeed iyo Dawladda Talyaaniga ;

HADDII LA HUBSADAY : in Sharikadda «Impresco» u ka soo gaaray gudashada hawlihii ay u qabanaysay sharikadda «Impregilio» kharaj dheeraad ah iyo khasaaro lama filaan ah ;

ISAGOO AQOONSADAY : In Sharikadda «Impresco» ku jirto dhibaato xagga dhaqaalaheeda, loona baahan yahay in la taakuleeyo maadaama ay tahay Sharikad waddanka muddo dheer ka dhisan :

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAYAA :

Qodobka 1aad

1) In Wasaaradda Maaliyadda ay siiso Sharikadda «IMPRESCO» lacag oo dhan So. Sh. 2.000.000 (laba malyan shilin somali) oo kaalmo ah, si ay Sharikaddaas ugu suura gasho dib u noolaynta iyo hore u wadidda hawladeeda.

2) In lacagta So. Sh. 2.000.000 (labada malyan) ah loo dhigo Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ;

3) In wax allaale wixii deyn ah oo ay Dawladdu ku leedahay Sharikaddaas (ha ahaato canshuur ama deyn caadi ah), bixinteeda dib loogu dhigay iyadoo Hayadaha deynta ku leh iyo Sharikaddu ay isla meel dhigi doonaan habkii ay Sharikaddu deynka isaga gudi lahayd ;

4) In Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Xamar ay u celiso Bankiga wixii qoraallo ah oo ku saabsan deynta loo haystay Sharikadda «IMPRESCO» isla markaasna ay Maxkamaddu ka noqoto wixii xayiraad ahaa oo ay hore u soo saartay nooc kastaba ha ahaadeen..

5) In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed uu ka joojiyo Sharikaddaas wixii dulsaar ah ee la xiriira lacagtii deynta ahayd.

Qod.2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Jaalle Madaxweynaha:.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxaa laga soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.12.78

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J.D.S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 145
Muqdisho, 31 Dis. 1978
Hantidhawraha Guud KMG,
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 6 ee 11 Abriile 1978; Qaadid Aas-aas Dan Guud awgeed ee waqti hore uu lahaa JAALLE MAXAMED DAAHIR NUUR oo ay la wareegtay WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA SOOMAALIYEED kuna yaal Muqdisho - Xaafadda 21ka Oktoobar.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ANNAGOO ARAGNAY : Warqaddii koowaad, labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21. Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY : Sharciyada Lamb. yihiin 17,18,19, soo baxday 1. Luuliyo 1976 oo ku saabsan xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ANNAGOO ARAGNAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13ka Setember 1973;

ANNAGOO ARAGNAY : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 600 loona tiriyey MAXAMED DAAHIR NUUR sida ku cad xaashidda ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consgzna) taariikhdeeduna ahayd 21 Feberaayo 1977;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda hubsimada dhulka soo sameeyeen Inj. Cabdikariim Cige Guuleed iyo Sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan Qaybta Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud taariikhdeeduna ahayd 24.1.1977;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda qiimeynta Aas-aaska taariikhdeeduna ahayd 18.12.19777 oo ay soo sameyeen Guddi loo xilsaaray kana kooban:-

Maamulaha Waaxda farsamadda dhulka ee W.H.G. Inj. Cabdikariim Cige Guuleed Sah. Abuukar Maxamed Sheekh iyo Cali Axmed Maxamed taasoo muujinayso qiimaha aas-aaska in uu yahay lacag dhan Shs. 960,00, (Sagaal boqol & lixdan) eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan;

XEER

Waxaa la caddeeynayaa in loo Qaaday Dan Guud awgeed Aas-aaska uu lahaa MAXAMED DAAHIR NUUR, iyadoo loo celinayo magdhow gaaraya Shs. 960,00 (Sagaal boqol iyo lixdan).

Sida ay muujinayso warqadda qiimayntu . Isla markaas waxaa la caddeeynayaa in qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Wakaaladda Madbacada Qaranka Soomaaliyeed:-

Muqdisho, 11 Abriil 1978:-

WASIIRKA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

WASIIRKA WARFAAFINTA IYO
HANNUUNINTA DADWEYNAHA
W.S. CABDI QAASIM SALAAD XASAN

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 19
Muqdisho, 18 APR. 1978.
ku sime Hantidhowraha Guud
Dr. Axmed Shire Maxamuud.

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 7 ee 30 Sebteembar 1978, Siismo dhul Dowladeed, la siiyey WAKAALADDA FILIMMADA SOOMAALIYEED kuna yaal Xamar - Degmada Kaaraan - kuna fadhiya mq. 80.000./

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
Waaxda Sahanka iyo Degaanka Mag.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Ka-21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 14 oo 3 Juunyo 1962 iyo beddeladdii ka dambeeyey kuna saabsanaa Nidaamka Maamulka Guud ee Dawladda (Ordinamento del Governo);

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976 kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda ee la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay 1da Nofembre 1973 Sharicga dhulka dhismaha ;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jannaayo 76;

ISAGOO ARKAY : Warqadda lamb. yahay WFS-F5-56-7362-78 taariikhdeeduna ahayd 21.9-1978 ee ay soo qortay WAKAALADDA FILIMMADA SOOMAALIYEED oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul ka soo horjeeda Kontroolka kana saaran Jidka Balcad dhinaca qorax ka soo bax ;

ISAGOO ARKAY : Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sah. Aadan Xaashi Nuur iyo Inj. Cabdikariim Cige Guleed kana tirsan waaxda Sah. iyo Degaanka Magaleynta, taariikhdeeduna ahayd 25.9.1978:

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey WAKAALADA FILIMADA SOOMAALIYEED dhul Dowladeed ee cabbirkiisu yahay mt. 400X200 wuxuuna la mid yahay mq.80.000/ kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddada Balcad
Bari waxaa ka xiga : Waddo

Muqdisho, 30 Sebt. 78

WASIIRKA

WASARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka Lamb. 1 Bogga lamb. 23.
Muqdisho, 1 Ott. 1978.
Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
Sax. Xuseen Cabdulle Cali

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 8 ee 12 Diseembar 1978. Dhul dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle CABDI XASAN CIGAAL ku yaal Muqdisho Degmada Cabdicasiis kuna fadhiya mq. 2. 650

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta

ISAGOO ARKAY : Xaanshada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 17,18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976 kuna haabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 41 soona baxday 1da Nofembre 1973 Sharciga dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961kii;

ISAGOO ARKAY : Arjigii uu keensaday AXMED CABDULLE MAXAMUUD taariikhdu markay ahayd 19 Agoosto 1962, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho Degmada Cabdicasiis;

ISAGOO AQOONSAN : Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyey looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 1.10 taariikhdeeduna ahayd 1da Oktoobar 1962, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 8064, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga Dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho - fadhigoodi 28oaad taariikhdeeduna ahayd 31-12-68 kuna saabsan dhismo Filla ;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. 10720 ee 26 DIC. 1962, kana soo baxday Xafiiska Casshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in AXMED CABDULLE MAXAMUUD uu bixiyey Lacag dhan Sh. So. 5.300/- kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka la weydiistey, kuna fadhiya mq 2.650/= loona tiriyey AXMED CABDULLE MAXAMUUD sida ku cad warqadda siismada dhulka. (Verbale di consegna) taariikhdeeduna aheyd 29 Nofembre 1964;

ISAGOO ARKAY : Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta farsamada sah. Aadan Xaashi Nuur, kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaleynta taariikhdeeduna ahayd 25/10/1978, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha Dowladda Hoose taariikhdu markey ahayd 31 Dicembre 1968 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq. 2.650/= kuna yaal Muqdisho - siina Liido.

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) degsimada guriga ku dhisan Xamar Degmada Cabdulcasiis - laguna siiyey warqadda Lam. yahay 9549 ee 14.9..969 ee Dowladda Hoose ee Xamar oo caddeyneysa in dhismaha waafaqsan-tahay;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) Lam. 5140 Rep. taariikh 23.7.1970 lagu diiwaan geliyey Xamar 5.4.1971 al n. 924 Atti Pubblici Vol. eber oo ah caddeynta Notaayada Dr. XaSAN WARSAME CALI taas oo AXMED CABDULLA MAXAMUUD ka gaday kuna wareejiyey CABDI XASAN CIGAAL wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 2.650/= kuna yaal Muqdisho Degmada Cabdicasiis;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibiliat) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saarayaa

## X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed uu siisay, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday CABDI XASAN CIGAAL in uu dhisto. (Dekeretto di libera Disponibilita) dhulkaasi oo ku fidhaya mq. 2.650/= kuna yaal Muqdisho Degmada Cabdicasiis:-

Muqdisho, 12 DIC. 1978:-

W. S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 34.
Muqdisho, 26 DIC. 1978.
Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
Sax. Yuusuf Cali Nuur.
L. 1

# QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
### BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeysayaa in Dhulkii uu soo waydiistay Jaalle Sheekh Xasan Cabdullaahi maalintii 23.6.66 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmad Wardhiigley Qaabkiisuna ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 30X80 kuna fadhiyay 2400 Mdh. looga qaaday dan guud awgeed looguna Bedelay Dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad sidaas awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa 11681 oo ka baxday Xafiiska waxey isu bedeshay sida hoos ku tilmaamas:

Dhulka loogu Bedelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya 2400 Mhd.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 49.50 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Jid

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
### BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeysayaa in Dhulkii uu soo waydiistay Jaalle Maxamed Macallin Caalin maalintii 30.7.66 loosa ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 60X50 kuna fadhiyey 3000 Mdh. looga qaaday dan guud loouna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidaka Balcad sidaas awgeed Naadadii Hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 10.18/2538/67 oo ka baxday xafiiska waxey isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 86 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 87 B.
Muqdisho 24 Agoosto 1978

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeysayaa in Dhulkii uu soo waydiistay Jaalle Maxamed Cali Abtidoon maalintii 16.10.1975 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Jidka J. Daa'uud uu iska bedelay cabbirkii hore qaabkiisu ahaa Trebesiyo addimihiisuna ahaayeen (44+40)X20 kuna fadhiya mq. 840 sababtoo ah qorshaha oo is bedelay.

Sidaas awgeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/532 ee 22.9.1976, kana baxday xafiiskaan, waxey isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallahaas qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiihuna yihiin 20X30 kuna fadhiya mq. 600

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam.12 W.
Koosfur waxaa ka xiga Waddo 6 MIT.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 4 W.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 2 W.

Muqdisho 18 Set. 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 3

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeysayaa in Dhulkii uu soo waydiistay Jaalle Faaduma Sayid Cusmaan maalintii 20.4.77 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Hodan Qaabkiisuna ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 mdh. looga qaaday danta guud looguna badelay Dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad sidaas awgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/443 oo ka baxday xafiiska waxey isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman:.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam.34 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 31 B.
B a r i waxaa ka xiga: Jid

Muqdisho 18 Set. 1978

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXADA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynaa in Jaalle Maxamed Shabeel Cawaale uu soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 29.6.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 2043 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2044 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 2040 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaa-laynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho 24 Agoosto 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariim Cige Guuleed

L. 5

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud xuseen Maxame uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka iyo Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 9.1.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 703 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 702 Y
B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 706 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 24 Agoosto 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyoDeg. Magaalaynta

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xasan Caddo iyo Maxamuud Jiino uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 23.3.66 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Demada Yaaq-shiid Qaakiisuna yahay Regtangolaare Addmihiisuna yihiin 60X20 kuna fadhiya 1.200 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Loto N. 89,78
Koonfur waxaa ka xiga: Loto N. 91,76
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Wadada Balcad

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 7

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Mukhtaar Sheekh Muxudiin uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 31.10.76 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X20 kuna fadhiya 1.200 MQ.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Loto N. 90.77
Koonfur waxaa ka xga: Loto N. 92.75
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Wadada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadiija Xalane Maxamed uu soo qortay ArjiWaaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 18.6.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degamada Yaaq-shiid Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimiisuna yihiin 30X40 kuna fadhiya 1.200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 642 iyo 644 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Wadada 21ka Oktoobar.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 639 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 645 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:
Muqdisho 24 Agoosto 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & MAGAALAYNTA.
INJ. Cabdikariim C. Guuleed

L. 9

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
—NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdulle Shiidle uu soo qortay Arj Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 17.5.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga Dhul lam. 819 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 822 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul am. 818 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynaaa in Jaalle Aamina Maxamed Cali uu soo qortay Arj Waaxda Sah. yo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 15.1.78 uu waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisunna waa 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 661 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 664 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 660 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 11

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA**
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jamiila Maxamed Cali ay soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaeynta maalintii taariikhdu ahayd 7.1.78 uu ku wadiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaadtan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 524 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 521 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 525 Y

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 12

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaliima Sacdiya Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintoo taariikhdu ahayd 7.1.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fahdiya 600 MQ.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 448 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 449 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 13

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Salaad Ducaale Cabdi uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu ahayd 13.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 2034 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2033 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 2037 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 14

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Canab Cabdi Cilmi uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 13.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq. shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 793 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam.796 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 793 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariim Cige Guuleed

L. 15

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA**
NAADO DHUL

Waxaa lacaddeynayaa in Jaalle Aamina Maxamed Xaaji Baydal uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 1.4.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 3045 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2046 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 3043 Y

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu s i fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana doodi karaa (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariim Cige Guuleed

L. 16

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Ciise Cali Ax. med uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xabar, maalintii taariikhdu ahayd 31.3.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 590 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xigaa: Dhul lam. 587 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 591 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariim Cige Guuleed

L. 17

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Maxamed Warsame uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu aheyd 17.6.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Cabdul-Casiis Qaabkiisu Trobesiyo Addimihiisuna waa (36+30)X3 kuna fadhiya 99 Mq.

SOODIMIHIISUNA WAA SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddd
Koonfur waxaa ka xiga: Gal Lam. 1123/60
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 998/68
B a r i waxa ka xiga: Wadada Sanca

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 24 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Isaaq Cali Carraale uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu ahayd 13.8.78, uu ku weyliistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiihuna yahay Trabesiyo Ad-dimihiisuna yihiin (30+100) X200 kuna fadhiya 1.000 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed
Koonfur waxaa ka xiga: Wadada 21ka Oktoobar
Galbeed waxaa ka xiga: Dhulka Jaylaani Abu.
B r i waxaa ka xiga: Waddo Cad.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki ka-raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maal-mood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 10 Seteber 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 19

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

L. 20 Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Qaasim Cabdi Ga-boobe uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaa-leynta Xamar, maalintii taariikhdu ahyad 10.1.78 uu ku way-diistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimimiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 606 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 603 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki ka-raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maal-mood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 10 Seteber 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciid Maxamed Maxamuud uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 8.1.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowldeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 615 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 614 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 10 Seteber 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 21

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciido Sheekh Maxamed Xuseen uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 12.12.77 uu ku waydiistay gaba dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiihuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1.200 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 399 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 393 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 387 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 10 Seteber 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Sheekh Hiloowle Maxamed Nuur uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 20.8.78 uu ku waydiista gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 915 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 916 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 912 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 10 Seteber 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 23

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Ibraahim Guuleed (INDUSTRIA CHIMICA E RESINE) uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 29.6.1978 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo k yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin (120+100)-X100 kuna fadhiya 11.000/ MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Wadada Xalane.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 9 Setember 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayáa in Jaalle Maryan Xuseen Xasan uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalenta Xamar maalitii taariikhdu ahayd 1.1.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 952 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 951 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 955 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 10 Setember 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 25

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Xaaji Maxamed uu u soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.G. maalintii taariikhdu ahayd 18.12.60 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Muqdisho Degmada Cabdul Casiis Qaabkiisu yahay Trebesiyo Adlimihiisuna yihiin (60 50X40) kuna fadhiya 2.200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed
B a r i waxaa ka xiga: Dowladeed

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 4 Jannaayo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 26

## MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L.9/9/65 N.2 lumidda Jeeg wareega oo lam. 210530 oy ku qoran tahay di Shs. 2.000, Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 4aad.

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeg wareega ka dib markii ay ka soo wareegato 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeega cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Maxamed Maax Cali ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci, ah avadoo la sugaayo muddo 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 29.10.78

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

W.S. (Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 27

## SOMALI BOTTLING COMPANY HARGEYSA

## DIGNIIN ISKU YEERID AH

Dhammaan waxaa loo yeerayaa Saamileyda Sharikadda in ay isku yimaadaan Shirweyne caadi ah iyo mid aan caadi aheyn 27.3.1979 Saacaddu markey tahay 16 p.m. Xarunta Hargeysa marka hore, haddii loo baahdana mar labaad 5.4.1979 isla xarunta iyo saacadda kor ku qoran, taasoo waafaqsan qodobada 2366-2369 X.M. iyo wixii la mid ah oo la xiriira qodobbadaas.

Haddii ay dhacdo in shirkaas majooritiga isugu imaanwaayo wakhtiyada kor ku xusan, waxaa isla shirkaas lagu qaban doonaa Xarunta labaad ee Shirkadda Xamar 5.5.1979, saacaddu marka ay tahay 17 P.M.

Sida Qodobada Xeerka Madaniga ah, waxaa laga hadli doonaa arrimaha hoos ku qoran:

1- Dhinaca caadiga ah ururintaXisaabaadka iyo ogolaanshada Miisaaniyadda.

2- Dhinaca aan aheyn caadiga, siyaadinta maaliyadda, oggolaanshada saamiga shirkadda in lagu daro dad cusub, ama la diido iyo habeyntii dadkii hore wixii aan si sharci ah ugu jirin Shirkaddu sida Qodobka 2441 X.M.

3- In Ia doorto Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hatidhawrka

4- In laga hadlo wixii arrimo ah ee loo baahan yahay oo la xiriira kuwa kor ku xusan.

Muqdisho 5.2.1979

L. 27/Bis

MAAMULKA SHIRKADDA